

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

#### BOOQASHADI DACWADEED EE ZAMBIA, SH. MAXAMED IDRIS

Waxaan nasiib u yeeshay inaan raaco Sh. Muxammad Idris Axmed safartii dacwada ee Zambia 25/12/2009 ilaa 4/1/2010, anoo sheekha kala lug helay Johannesburg markuu kasoo kici timay Makka, kadibna aanu wada tagnay Lusaka, bisha 5/1/2010 aanu kusoo noqonay magaalada Johannesburg oo sheekhu isla galabtaasba ka bilaabay nashaadkiisi dacwada ah, iyadoo aan idiin kasoo qori doono Inshallaah, safartiisa South Afrika oo ah tii lixaad ilaa iyo 2006, halkaasoo ay ka qabsoomeen mashaariic dacwadeed oo aad u waaweyn.

#### LUSAKA – ZAMBIA

Waxaan raacnay diyaaradda South African airways, waxaanuna gaarney airporka Lusaka 24/12/2009 21:15. Waxaa durbadiiba immigrationka noogu yimi nin ka mida guddiga dacwada oo nala dhameeyey fiisooyinka, kadibna bannaanka ayaanu usoo baxnay halkaasoo ay nagu sugayeen koox ka mida ducaadda Lusaka oo isa salaamed ka dib aanu u dhaqaaqnay xaggii hoyga naloo diyaarshey oo ah hotel (Luwindizi) oo u dhow degaanka Soomaalida xaafadda chaisa.

#### JAALIYADDA SOOMAALIYEED EE ZAMBIA

Haddaan in yar ka tilmaano Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Zambia wexey u noqoneysaa taariikh ahaan 60kii. Markii zaambia xornimada qaadatay ayaa dhinaca Rodesia (zimbaabwe) ka xirantay, waana wadan aan bad lahayn, kadibna wexey noqotay iney shidaalka kasoo daabulaan Daarasallaam Tanzania, talyaaniga oo baabuur badan ka gaday ayaa kula taliyey iney Dureewaliin Soomaaliya keensadaan waayo hal qof oo Zambian ah oo baaburtii fiatka wadi karta lama hayn xilligaas. Kadibna Dawladda Zambia ayaa qandaraas Soomaalida ku siisay keenidda Dureewaliin, halkaasoo ilaa 500 oo dureewaliin ah la keenay oo shidaalka kasoo daabusha Tanzania, wexeyna ahayd shaqa qaran oo Madaxweynaha Keneth Kaunda ayaaba baaburtii u horraysey ka hor tegi jirey, odayaashii dureewaladaas ka haray

qaarkood waa joogaan oo nooga sheekeeyeen, abaal ayeyna Dawladda Zambia soomaalida arrinkaa ugu haysey ilaa hadda waana mid taariikhda Zambia galay. Dadkaas hore wexey u badnaayeen, dad kasoo jeeda Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ama aaga hadda loo yaqaan (Puntland) ilaa haddana iyagaa ugu badan Jaaliyadda joogta dalka.

Jaaliyadda Soomaalida Zambia waa jaaliyad shaqaysata, wexeyna dalka ku leeyihiin hanta fiican oo isugu jirta guryo, dhulal, ganacsi shirkado, wershedo, baabuurey, iyo xoogsata yar yar.

Waxaa ku taal Safaarad ay Soomaalidu leedahay oo ka kooban dhul iyo guryo baaxad weyn, kuna yaal meelaha magaalada ugu qaalisan, waana hanta qaranka Soomaaliyeed, wexey u dhoowdahay Guriga Madaxtooyada, qayb xafiisyo iyo qayb degaanka safiirka, waxaana naloo sheegay ninkii Safiirka ahaa ee Dawladdii u dambeysey ugu dhacday ayaa jooga, hantida Safaaradana si wanaagsan ayuu u ilaashey.

#### **BARNAAMIJKA SHEEKHA EE LUSAKA**

Barnaamijka Sheekhu wuxuu bilawday Fajarkii 25/12/2009 oo jimce ahayd, halkaasoo uu kelmad masjidka ka jeediyey, kadibna khudbaddii Jimcaha oo ku saabsanayd (Daryeelka Masaajidda) kadibna casarkii iyo Muxaadaro dumarka ah ee xarunta Al Umma oo casuumadda sheekha fidisay. Sabtidii iyo Axaddii waxaa la kireeyey Hall weyn oo rag iyo Dumara oo xarun ay leeyihiin walaala hindiya ku yaal. Halkaas labada maalmood waxaa isugu yimi dadweyne aad u fara badan oo reer Lusaka ah, rag iyo Dumar iyo Carruur, waxaana lagu soo daabulay baabuur yar yar iyo Basas waaweyn oo uu ku tabarucay nin Muslima oo Zambian ah oo gacanta Soomaalida ku Islaamay. Sheekhu wuxuu halkaa ka jeediyey, Muxaadaro 2ba qaybood ahayd kuna saabsanayd (Jaaliyadaha Soomaalida Qurbaha) iyo sidey diintooda iyo dhaqankooda ku dhawran karaan. Wuxuuna mar kasta sheekhu ku bilaabayey aayado Qur'aan ah si khushuuc dadka ku reebtay oo

meesha oo dhan ay aamustay.



Muxaadarada kadibna wuxuu sheekhu yaboohiyey lacag ururin loo sameeyey Masjid Laga Dhisayo Lusaka oo jaamac ah, waana kii ugu horreeyey marka laga reebo masaajid yar yar oo garaashyada ku dhex taal. Wexeyna ahayd markii ugu horreysey ee Lusaka lacag intaa leeg laga urursho, 160 kun oo Doolar iyo 30 Kun oo Bulikeeti ah, iyo 45 Gaari oo carro ah, isku dar 180 kun ku dhowaad, taasoo dadweynihii reer Lusaka aad ula cajabeen , kuna ogaadeen iney wax badan qabsan karaan jaaliyad ahaan, waana siduu sheekhu ku booriyey, iney Masaajid iyo Iskuulo iyo Xarumo dhalinyaro intaba samaystaan, si ay diintooda ugu baaqi noqdaan, uguna midoobaan danhooda, iyagoo dhinac iska dhigaya ama dib u dhiganaya ku kala qaybsanaanta waxa Dalkii hooyo ka socda oo iyagaba soo bara kiciyey, taasoo aan xal iyo Mustaqbal midna u noqonayn.



dadweynihii reer Lusaka ee meesha soo buuxshey



dadweynihii reer Lusaka iyo ardaydii safka hore



Gabdhii reer Lusaka oo Muxaadarada la socda



Ardayda reer Lusaka oo Nashiid Qur'aanka Qaadeysa

Waxaa barnaamijka ka mid ahaa gabdhaha oo saddex Muxaadaro lasiiyey, kasokow kuwa ay dadka la wadaageen, taasoo muujineysey ahmiyadda gabadha Muslimadaa ku leedahay dacwada iyo Bulshada.

Maalintii isniinta waxaa sheekhu booqday xarumo badan oo ganacsi oo ay leeyihiin Soomaalidu, waxaa Sheekha iyo ragga la socdey loo fidiyey Casuumado aad u weyn oo ay isugu yimaadeen xulka Jaaliyadda Lusaka Culimo, Ducaad, Dhalinyaro, Odayaal iyo Ganacsato. Waxaa ka mid ahayd Xarumaha uu sheekhu Booqday Wershedda Galayda Shiida kana mid ah kuwa ugu waaweyn dalka oo uu leeyahay nin Soomaaliya oo ganacsato ah, Xaaji Maxamed Cali Mursal, waxaana nagu soo wareejiyey Eng. Xasan Cali Mursal oo ka mida maamulkeeda. Wexeyna soo saarta ilaa 110 Ton maalintii, waana raashinka ugu badan ee wadanka laga cuno.



Wershedda Galayda shiidda





Qayb ka mida wax soo saarka wershedda



Sheekha iyo Xasan Mursal dhinacisa taagan

Duhurkiina wuxuu sheekhu Muxaadaro ka jeediyey Masjidka ku dhex yaal wersheda oo dad badani ku tukado, wuxuuna ka hadlay (Muhimadda ay shaqadu leedahay iyo Nidaamka Islaamka) iyo shaqada la hufo karti iyo waqtigeedana lagu guto, xirfadana la barto si wax soo saarka muslimiintu u koco.



#### Muxadaradi Masjid Al ixsan

Isla galabtaas isniinta wuxuu sheekhu muxaadara kale ka jeediyey masjidka ku yaal garaajka (ohan) oo ah shirkaddii gawaarida ee ugu horreysey cinwaanku ahaa (miraha istiqamada) ku toosnaanta tubta toosan, maqribka ka dibna wuxuu sheekhu kulan la qaatay guddiga dacwada ee Lusaka oo uu siiyey dardaarankii ugu dambeeyey sidey dacwada u xoojin lahaayeen, nidaamkooda u adkayn lahaayeen, bulshada uga faaiidayn lahaayeen iney kiciyaan mashaariic faaiida u leh diintooda iyo adduunyadooda.

#### SAFARTII NDOLA

Subaxdii Talaadada 29/12/2009 waxaanu u dhaqaaqnay xagga Ndola gobolka maarta, taasoo ah magaalada labaad ee soomaalidu ku badantahay, kuna leedahay ganacsiyo kala duwan, una badan baabuurta xamuulka iyo shidaalka.

Waxaanu sii marnay magaalada kabiiri oo ay ku noolyihiin dad yar oo Soomaali ah, waxaana wadada ku yaar xarun shidaal oo ay leeyihiin ganacsata Soomaaliyeed, iyo haamo shidaalka lagu kaydiyo. Waxaa ku yaal Masjid yar iyo dugsi qur'aan oo aanu booqanay.



Sh. Maxamed oo la taagan macalinka dugsi Kabiiri

Kadibna waxaanu sii wadney safartii waxaanuna gaarnay Ndola Duhurka ka hor, halkaasoo uu nagu soo dhoweeyey madaxa guddiga fulinta dacwada Ndola Geedi.

Nashaadkii Ndola

Subaxdii Arbacada wuxuu Sheekhu Muxaadaro siiyey Dumarka, Maqribkiina Ragga, Maalintii khamiistana Muxaadaro galabtii ah, waxaa dhinac socdey Dawro gaar u ah Ducaadda iyo Macalimiinta oo sheekhu duruus gaara ku siiyey ducaadda sidey xirfadda dacwada u kordhin lahaayeen, wexeyna

bexeysey fajarka ka dib, schoolka Iqra ayeyna ka bexeysey, sidaas ayaana  
ducaadda Lusaaka loo siiyey  
Dawrada.



Masjidka Ndola xaafadda Twapia & Schoolka Iqra



**IQRA ISLAMIC SCHOOL**

P.O. BOX, 240350, TWAPIA.

NDOLA, ZAMBIA.



Sheekha oo la taagan qaar ka mida madaxda dacwada Zambia



### Xafiiska Schoolka Iqra, Ndola

Maalintii jimcaha wuxuu Sheekhu Khudbadda ka akhriyey Masjidka ku dhex yaal Garaajka Xaaji Ciise Farax Geesdiir, oo ka mida Ganacsatada waaweyn ee Zambia, ahna ninka ugu gacan dheer oo wax badan oo xoolihiisaa ku bixiya dacwada iyo Dugsiyada iyo macalimiinta. Kadibna waxaa wax loo ururiyey Madarasada iyo Markaska Iqra.

Maalintii Sabtida iyo Axadda waxaa Muxaadarrooyin lagu qabta Hall weyn oo magaalada ku yaal bartameheeda, Halkaasoo sheekhu labada maalinba muxaadarrooyin uga soo jeediyey Bulshada reer Ndola rag iyo Dumar, aadna



loo yimi oo ilaa 8 bus dadka lagu soo daabulay,



Furitaankii Muxaadarrooyinka Ndola



Dadweynihii rer Ndola oo dhegeysanaya



Sheekha oo Jedinaya Mux.Ndola



Barxada xarunti Mux. Iyo basaski dadka qaadayey



Dhinac kale dadweynihii soo xaadiray

Maalintii isniinta ee ugu dambaysey nashaadka Ndola waxaa sheekha lagu martiqaaday inuu furo Schoolka Iqra, kaasoo loo sameeyey xaflad si heer sare ah loo soo agaasimay, uuna qaban qaabiye ka ahaa Sh. Muxyidiin oo ah Gudd. Shuurada Dacwaqda Ndola, waxaana xafladda oo lagu qabta barxadda weyn ee schoolka Iqra Twapia, madax ka socotey Dawladda Zambia sida Guddoomiyaha dawlada hoose ee xaafadda Twapia, Guddomiyaha Bulshada, Taliyaha Booliska, Masuul ka socda Wasaarada Wax barashada, sidoo kale Madaxda Jaaliyadda Soomaalida, Ganacsatada uu ugu Horreeyey Xaaji Ciise Faarax Geesdiir oo tabaruca ugu badan schoolka ku bixiyey, iyo waalidiintii, Ardaydii Macalimiintii, ducaadii iyo dadweyne kale.

Halkaas waxaa khudbado badan ka jeediyey madaxda Zambia oo u mahad celiyey jaaliyada Soomaaliyeed oo ay ku tilmaameen mid fir fircoon, oo wax

kusoo kordhineysa dalka iyo dadka, waxaa kaloo kelmad cilmiga ku saabsan iyo sida muslimiintu u ahaayeen dadkii adduunka macalimiinta u ahaa jeediyey Sh. Siddiiq oo ah daaci Zambian ah, kana soo baxay jaamacada Madiina, ugu dambayntiina waxaa kelmad tawjiih ah jeediyey Sh. Maxamed Idris una badnayd afka ingiriiska, qaybna soomaali ahayd, waalidiintana ku dhiirigeliyey iney caruurta schoolkan islaamiga ah ku qoraan, si rasmiyana albaabada ugu furay Schoolka Iqra.



Ardaydii wiilasha



Ardaydii Gabdhaha Schoolka Iqra/Ndola



Sh. M Idris, Xaaji Ciise, Sh. Siddiiq





Gabdhihi iyo Hooyooyinkood



Masuuliintii Zambianka ahaa ee xaflada ka qayb galay



Sh. Siddiq oo kelmad jeedinaya



Sh. Maxamed oo Kelimadii Khitaamka iyo Furitaanka Schoolka Jeedinaya

Wuxuu sheekhu si gaara ula kulmay Culimada iyo Macalimiinta, wuxuu kaloo si gaara ula kulmay Odayaasha iyo Ganacsatada waaweyn, wuxuuna ku booriyey Midnimada iyo wada shaqaynta iyo iskaashiga si loo gaaro himilooyinka Jaaliyadda ayna u ilaashadaan diintooda iyo adduunyadooda.

Wuxuu sheekhu wax badan dadweynaha kala hadlay iney arrimaha sidey u kala muhiim san yihiin u kala hor mariyaan, arrimaha dalkii ka socdana ayan caqabad ku noqon is kaashiga jaaliyadda iyadoo ku nool qurbaha ilmohoodiina dayacan yihiin, taasina ayan maslaxad u ahayn.

**KU NOQOD LUSAKA**

Xafladdu markey dhamaatay ka dib, ee la qadeeyey, waxaanu u bokhoolnay Lusaka, oo aanu soo gaarney salaadii cishaha, subaxdii talaadada wuxuu sheekhu xarunta Al Umma, ka jeediyey Muxaadaradi ugu dambeysey oo rag iyo dumar yimaadeen, kadibna wuxuu DHAGAX DHIGAY sheekhu Masjidkii

Lusaka waxaana kasoo qayb galay ducaadda iyo odayaasha iyo dumarka.



Dhagax dhigii Masjid Al Ummah ee Lusaka 5/1/2010 Sh. M. Idris



### Dhagax dhigii Masjidka Lusaka

Isla Duhurkii talaadada 5/1/2010 ayaa Sh. Maxamd oo uu la socdo Axmed Cabdi (Dheere) kasoo duuleen Lusaka waxaaney soo gaareen Johannesburg, South Africa galabnimadii 4 Galabnimo, isla habeenkaas wuxuu Sh. Maxamed Idris Muxaadaro uga jeediyey Masjid Shaafici,

Johannesburg Dadweyne Soomaaliyeed oo aad u fara badan,



Muxadaradii Masjidka Johannesburg 5/1/2010

Wexeyna ahayd ilaahay fadligiis inuu Sheekhu Subaxdiina Muxaadaro ka galo Lusaka Zambia, Masjid Al Ummuna dhagax dhigo, Isla Galabtaasna Muxaadara Kale ka jeediyo Masjidka Johannesburg, isagoo intaba ku dhiiri gelinayey kuna waaninayey Jaaliyadaha Soomaaliyeed iney diintooda iyo dhaqankooda iyo jiritaankooda ku dhawri karaan wada jir, wax wada qabsi, is jeclaan, iyo iskaashi, xitaa hadii wax laysku khilaafsan yahay in waxa laysku waafaqsan yahay danta guudna ah layska kaalmaysto.

Waxaan idiin soo gudbin doonaa nashaadka Sheekha socdaalkiisa South Afrika oo uu ku mari doono Gobolo badan oo ay ku dhaqan tahay Jaaliyadda soomaaliyeed ee South Afrika, sida Cape town, iyo Port

Elizabeth, Waxaana Qorshaysan inuu Tago, Nelspruit, Tzanin, Naz,  
Pettesburg, Rustenburg, iyo meela kaloo badan.

Waxaa diyaariyey

Axmed Maxamuud Cabdi

Xoghayaha Guud ee Majlis Al Bayaan Council, Johannesburg

South Africa , [Wacays99@gmail.com](mailto:Wacays99@gmail.com)

Faafin: SomaliTalk.com | Jan 10, 2010